# Takoorida iyo Khashkhashaadaha Goobta Shaqada

Discrimination and Harassment at Work

## Waa kuwee Noocyada takooridka iyo khashashaada ah ee sharci-darrada ah?

Ma aha in cidna kuula dhaqanto si ka duwan dadka kale, ay kuu diido inay shaqo ku qorto, lacag ka yar tan shaqaalaha kale ku siiso, ku siiso xeerar ama shuruudo shaqo oo ka duwan kuwa shaqaalaha kale. ku khashkhashto adiga ama shaqadaada kaa erido iyadoo sababtu tahay

- Sinjigaaga
- Jinsigaaga
- Midabkaaga
- Qowmiyadaada *(oo ay ku jirto timo-jarka caadiga ah)*
- Diintaada
- xaaladaada qoys *(in aad caruur ama uur leedahay)*
- xaalada guurkaaga *(kali, guur, furiin, kala bixid, ama laga dhintay)*
- Xubino gudi deegaan hoose oo ka jira oo xaquuqda aadanaha u dooda
- Martabadaada guur
- Helida Gargaar Dowladeed
- Naafanimadaada
- Da'daada
- Cid aad jeceshahay inaad la galmooto
- Jinsiyadaada aad tahay
- Akhbaartaada hidaha
- Qaaruunta aad ka soo jeedo (laakiin waa ay ku waydiin karaan cadeyn ah in laguu ogol yahay inaad ka shaqeyso U.S.)

Shaqada lagaama eryi karo, lagumana khaskhakhasi karo laguulamana dhaqmi karo si ka duwan dadka kale caytoobid awgeed. Caytoobidu waxaa dhici karta inay qayb ka tahay sababta laguu QORI waayey shaqada, laakiin ma noqon karta sababta kaliya.

## Maxaa ka mid tusaalayaasha qaabilka ah ee takoorida iyo khashkhashaada?



- Dalaciinaha waxaa la siiyaa uun shaqaalaha cadaanka ah xataa hadii shaqaalaha kale ee sinjiyadaha kale ahi ay leeyihiin tababar, khibrado iyo wax qabad shaqo oo la mid ah kuwa shaqaalaha cadaanka ah.
- Shaqada oo dadka aad la shaqeysaa ay macago xunxun oo cunsuri ah kuugu yeeraan. Kormeerayaashaaduna ay og yihiin ayna waxba ka qaban.
- Aad waydiisatay shaqadaada inaad u isticmaasho xafiis banaan salaada xilliyada nasiinada ayna ku yiraaheen maya, laakiin ay u ogolaadaan shaqaale kale inuu u isticmaali karo qolka nasiinooyinka. Taasi waxa ay noqon kartaa takoorid diineed.

- Kormeerahaagu ku waydiisto inaad is shukaansataan ama uu kugu yiraa waxyaabo ceeb ah ama galmada la xiriira adiga. Mana aad doonaysid inaad xiriir la yeelato mana aad jeclid hadaladaas. Kolkaa uu kormeerahu uu kugu yiraa hadii aanan kaa helin waxa aan rabo ma laguu kordin doono lacagta.

- Shaqadu aysan dalacsiin haweenka la qabo waayo waxa ay u malaynayaan in haweenkaasi ay uur yeelan doonaan shaqadana ka tagi doonaan. Ama ma ay dalacsiiyaan waalidka ilmaha yaryar haysta waayo waxa ay u malaynayaan in ilmahu uu carqalad ku noqon doonaan waajibaadka shaqada ee waalidka.

- Maamulahaagu uu kugu qayliyo adiga uuna si xun kuula dhaqmo waayo afka Ingiriiska si fiican uguma hadashid adigu.

- Shaqadu ay hoos kaaga celisay jagadaadii hore kolkii aad gaartay da'da 56, ka dib kolkii aad shaqada ka shaqaynaysay 20 sanno sababtoo ah waa aad ka "waynaatay da'dii aad wax cusub baran lahayd."

## Maxaan sameeyaa hadii la I takooro ama la khashkhasho?

Hadii lagu takooro ama lagu khashkhasho iyadoo sababtu tahay sinji, jinsi, diin, iwm., waxa aad u baahan tahay inaad si degdeg ah ugu soo sheegto kormeerahaaga, Xafiiska Shaqaalaha (Human Resources), ama kormeere kale oo aad ku kalsoon tahay la hadalkiisa. Hadii aad awoodo arritan qoraal ahaan u samee. Nuqulna kala har.

## Maxaan ka sameyn karaa takoorida iyo khashkhashaada?

- Qor waxyaabaha adiga kugu dhacay ee aad dareensan tahay inaysan xaq ahayn.
- Qor taariikhda, waqtiga iyo magacyada cid walba ee kale ee goobta joogtay.
- Qoraal ka samee faalooyinka uu bixiyey, iyo wada hadalka aad la yeelatay kormeerahaaga.
- Ugu soo sheeg walaacyada aad qabto ee ku saabsan takoorida iyo khashkhashaada kormeerahaaga qoraal ahaan.



## Baxar miyaan geli hadii aan askhtakoodo?

Maya. Shaqadaadu kaama aar gudan karaan (aarsi) hadii aad adigoo daacad ah aad sheegato inaad tahay dhibane loo geystay takoorid ama khashkhashaad sharci-darro ah. Hadii shaqada lagaa eryo ka dib kolka aad soo sheegto takoorid waxaa dhici karta inaad dacaweyn karto shaqada.

**Marmarka qaarkood waa ay adag tahay in la cadeeyo waxa takoorid ama shashkhashaad ah iyo waxa aan ahayn. Hadii aad dareensan tahay in takoorid lagugu sameeyey ama lagu khashkhashay, wac mid ka mid ah hay'ada hoos ku xusan.**

Qaansheegadka sharciga ah ee ku saabsan takoorid ama khashkhashaad waa in lagu xareystaa muddo cayiman gudahood kolka ay dhacdo. Waqtigani waxa uu ku xiran yahay dacwada iyo hay'ada aad ka xareysato. **Laakiin mudadda waqtiga la xareysan karaa waa ay yar tahay**. Degdeg u wac cid ama waxaa waayi kartaa fursad aad ku ilaaliso xaquuqdaada.

## Wixii kale ee akhbaar ah ama sidda caawimaad loogu helo qaansheegadkaaga

**Minnesota Department of Human Rights**
Grigg's Midway Building
540 Fairview Ave North, #201
St. Paul, MN 55104

Telefan: (651) 539-1100 ama 1-(800) 657-3704
MN Relay 711 or 1-(800) 657-3775
http://mn.gov/mdhr/

**Equal Employment Opportunity Commission**
330 South 2nd Ave., Suite 720
Minneapolis, MN 55401



Telefan: (612) 552-7306
TTY: 1-(800) 669-6820
www.eeoc.gov

**Minneapolis Department of Civil Rights**
City Hall, Room 239
350 South 5th St
Minneapolis, MN 55415

Tekefan: (612) 673-3012
TTY: (612) 263-6850
www2.minneapolismn.gov/government/departments/civil-rights

*Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen. **Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*** 

**© 2026 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**